

Sida loo helo Nambarka Caymiska Qaranka: Xog loogu talagalay magangalyodoonka loo oggolyahay inay shaqeeyaan

Isbeddel dhowaan lagu sameeyay sharciga dadka soo haajiray ayaa dhigaya in dadka magangalyodoonka ah *qaarkood* ay shaqayn karaan. Xarunta Sharciga ayaa goor hore soo saartay warqad xogwarran ah oo sharraxaysa sida magangalyodoonku inay shaqeeyaan uga codsan karaan Wasaaradda Arrimmaha Gudaha. Guji [halkan](#) oo raac tallaabooyinka.

Warqadda xogwarranka ee labaad waxaa loogu talagalay magangalyodoonka mar hore loo oggolaaday inay shaqayn karaan. Waxay sharxaysaa waddada la maro si loo helo Nambarka Caymiska Qaranka oo waxaad ku heli kartaa qoraalka afafka Carabiga, Faarsiga, Soomaaliga iyo Tigriinya.

Miyaad weligaa codsatay oggolaansho shaqo? Waxaa lagu soo diray Warqadda Diiwaangelinta Magangalyodoonka (ARC). Warqaddu waxay xaqiijinaysaa in lagu oggol yahay inaad qaban karto shaqooyin gaar ah oo waxaa ku qoran 'Shaqo waa loo oggol yahay/ shaqooyinka shaqaale yaridu hayso'.



1. Waa maxay Nambarka Caymiska Qaranka?

Qof kasta oo dalkan Boqortooyada Midowday ka shaqeeya da'diisuna tahay 16 iyo wixii ka badan waa inuu leeyahay Nambarka Caymiska Qaranka oo qofka u gaar ah, waana mid aan isbeddelin nolasha qofka oo dhan.

Nambarkaaga Caymiska Qaranka wuxuu xaqiijinayaa in lacagta mushaarkaaga laga jaro si sax ah loogu qoro Caymiskaaga Qaranka. Badanaa waad u baahan tahay nambarkan marka aad la xiriirayso hay'adaha dowladda oo ay ka mid yihiin lacagta kabista dakhliga iyo canshuurta.

2. Miyaan u baahanahay Nambarka Caymiska Qaranka si aan shaqo u bilaabo?

Qofka shaqada ku siin doona wuxuu kaa rabi doonaa inaad tusto Nambarkaaga Caymiska Qaranka. Xarunta Sharciga waxay ku talinaysaa inaad codsato Nambar Caymis Qaran inta aadan shaqo bilaabin,

3. Sidee baan Nambar Caymis Qaran u codsan karaa?

Markaad Wasaaradda Arrimmaha Gudaha ka hesho Warqadda Diiwaangelinta Magangalyodoon oo cusub, waxaad diyaar u tahay inaad codsato Nambarka Caymiska Qaranka.

Waa inaad Nambarka Caymiska Qaranka hab online ah uga codsato [halkan NI Direct](#). Foomka codsiga waxaa lagu heli karaa af Ingiriis oo keliya. U qor faahfaahintaada sida ay ugu qoran tahay Warqadda Diiwaangelinta Magangalyodoon (ARC). Faahfaahinta waxaa ka mid ah:

- Magacaaga buuxa
- Taariikhda dhalashadaada
- Dalka aad u dhalatay
- Sida laguula soo xiriiri karo: cinwaanka iyo nambarka telefoonka
- Faahfaahinta baasaboorkaaga (haddii aad mid leedahay)
- Xaqiiji in:
 - Aadan lahayn Oggolaansho Deggenaansho Sugan
 - Aadan lahayn Warqadda Deggenaanta Boqortooyada Midowday (UK)
 - Aadan sugaynin in codsi dal-ku-gal (fiise) lagaaga soo jawaabo

4. Intee ayay qaadataa in la soo diro Nambarka Caymiska Qaranka?

Kaddib marka aad ku gudbiso codsigaaga si online ah, waxay qaadanaysaa inta u dhexeysa 4 ilaa 8 toddobaad in la soo diro Nambarka Caymiska Qaranka. Waxaa lagu soo diri doonaa boostada.

5. Miyaan u baahnahay inaan tago ballan si aan codsiga u dhammaystiro?

Waa suurtoagal in lagu weyddiiyo inaad xaqiijiso aqoonsigaaga adigoo tagaya ballanta Xafiiska Shaqooyinka iyo Kaalmada. Telefoon baa ballantan lagu sameeyaa, sidaas darteed waa inaad codsigaaga ku qorto nambarka telefoonkaaga oo sax ah. Turjubaan waad codsan kartaa marka aad ballan leedahay.

U sii qaado ballanta warqado badan aad heli karto sida:

- Warqadda ARC
- Foomka DAMIINTA 201
- Heshiiska guri deggenaansho ee MEARS
- Nuqul sawiran oo baasaboorkaaga ah/warqaddaada aqoonsiga (haddii aad mid leedahay)

6. Miyaan u oggolaan karaa saaxiibkay inuu isticmaalo Nambarkayga Caymiska Qaranka?

Maya, waa inaadan qof kale u oggolaanin inuu isticmaalo Nambarkaaga Caymiska Qaranka. Falkaasi waa wax-isdaba-marin oo wuxuu keeni karaa ciqaab dambiyeed oo wuxuu si xun u saameyn karaa codsigaaga magangalyodoon.

7. Weli maan helin Warqaddayda Diiwaangelinta Magangalyodoon (ARC). Maxaan sameeyaa?

Haddii Wasaaradda Arrimmaha Guduhu ay ku siisay warqad xaqiijinaysa in lagu oggol yahay inaad shaqayso laakiin aan weli lagu siinin Warqadda Diiwaangelinta Magangalyodoon (ARC),

codsi kale ayaad samayn doontaa. La xiriir Xarunta Sharciga (Law Centre) si aad ugala hadasho arrintaas.

8. Haddii aan shaqo bilaabo, miyay taageerada NASS/magangalyodoon ii socon doontaa?

Haddii aad shaqo billowdo way dhici kartaa in aan lagu siinin qaar ka mid ah ama dhammaan taageerada magangalyodoonka (NASS) guriguna uu ka mid yahay. Xarunta Sharciga ayaa soo daabici doonta xog dheeri ah oo ku saabsan arrintan.

Maxaan sameeyaa haddii aan dhib la kulmo markaan codsanayo Nambarka Caymis Qaran?

La xiriir Mashruuca Caddaaladda ee Xarunta Sharciga Waqooyiga Ireland.

✉ Migrationjustice@lawcentreni.org ☎ 028 9024 4401